

### Xannaanooyin qoys oo gaar ah

Xannaano qoys waa fursad loogu talagalay carruurta ugu yaryar, waan guryo gaar loo leeyahay.


### Xannaanooyin furan

Xannaanooyinka furan waa meelo bilaash ah oo wakhtiga gaaban ah oo waalidka ama dadka ilmaha ka masuulka ah la joogaan carruurta.

### Wakhtiga shaqada ee xannaanooyinka

Xannaanooyinka intooda badan waxay furanyihiin saacadda 07.30 ilaa saacadda 17.00, shan maalmo usbuucii.

Xannaanooyinka waxa la xidhaa maalmaha ciidaha iyo qorshaynta (shan maalmo sannadkii). Xannaanooyin badan ayaa iyana xidhan muddooyin ka mid fasaxa guud ee xagaaga.



# WARBIXIN KU

saabsan xannaanooyinka carruurta ee Baerum



## Xannaano carruureed – maxay tahay?

Xannaanada carruurta waxa ay iyada oo la shaqaynaysa guriga ay ilaalinaysaa baahida ilmuhu u qabo daryeel, cayaar iyo dhiirigelinta in waxbarashadu tahay waxa keenaya horumar dhinac kasta ah.

## Waa maxay sababta carruurta u aadayso xannaano?

- wakhti la qaadashada carruurta iyo dadka waaweyn ee kale
- in wax bartaan iyagoo adeegsanaya cayaar iyo hawlo kale
- inay bartaan dhaqamada kala duwan ee ka jira Noorwey
- inay bartaan af-noorweyji
- inay la saaxiibaan carruurta facooda ah

## Afka hooyo

Waxa muhiim ah in afka hooyo lagu hadlo marka guriga la joogo, waayo afka hooyo ayaa sahlaya barashada afafka kale. Ilmahaaga sii wakhti aad la samaysid hadallada caadiga ah, heesaha, maansada, sharciyada, sheekooyinka iyo buugaagta si afka hooyo u xoogaaysto.

## Waxyaalaha xannaanadu ka koobantahay

Xannaanada waxa carruurta ku baranaysaa qaybaha maadiga ah ee kala ah:

- xidhiidh-samaynta, afka iyo qoraalka
- jidhka, dhaqdhaqaaqa iyo caafimaadka
- farshaxanka, dhaqanka iyo hindisaha/hal-abuurnimada
- dabecadda, bey'adda iyo farsamada
- anshaxa, diinta iyo falsafadda
- bulshada
- tiro, meel iyo qaabka

## Bilowga

Maalmaha u horaysa ee ilmuhu bilaabo xannaanada waa in mid ka mid ah waalidku joogo si loo habsado la qaybsiga ilmaha.

## Waxa xannaanada ka dhaca maalintii

Xannaanada waxa lagu cunaa quraac, cunto duhur iyio cunto casar. Cuntooyinka qaar waa kuwo guriga laga soo qaato, kuwo kalena waxa laga bixiyaa xannaanada.

Maalintii xilliga ay carruurta joogto xannaanada waxa jira hawlo carruurta samayso oo ka dhaca gudaha iyo dibeddaba. Si carruurta uga faa'idsato hawlaha ka dhaca dibedda waa in carruurta wadato dhar ku haboon xilli-sannadeedka, si aanay u qaboobin ama u kululaan.

Carruurta ugu yaryar waxay seexataa xannaanada, inta badan dibedda iyagoo ku jira baabuurka lagu riixo.



## Warbixin farsamo

Sannadka oo dhan waa la codsan karaa boos xannaano. Si aad u heshid boos **ka bilaabmaya Ogost**, waa inaad **codsatid ugu dambeyn 1-da Maash**.

Haddii aad u baahantahay in lagaa caawiyo qaabka loo codsado boos xannaano, waxa aad la xidhiidhi kartaa Xafiiska Tilmaan-siinta (Veiledningstorget) ee ku yaala Kommunegården oo ku yaala Sandvika. Ama la xidhiidh xannaano ama rugta caafimaadka carruurta.

Qiimaha ugu sareeya ee laga bixiyoo booska xannaanadu waa isku mid xannaanooyinka oo dhan. Waxa la codsan karaa qiimo-dhimista walaalaha iyo qiimo-dhimis ku salaysan xaaladda dhaqaale. Waxa soo raaci kara bixinta lacagta cuntada xannaanada.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan xannaanooyinka Bærum iyo foomka codsiga oo elektroonig ah waxa aad ka helayaa: <https://www.baerum.kommune.no/barnehager>

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan qorista ama lacagta waalidku bixinayo waxa aad la xidhiidhi kartaa Xafiiska Tilmaan-siinta (Veiledningstorget) oo telefoonkiisu yahay 67 50 40 50.

## Xannaanooyinka dawladda hoose iyo kuwa gaarka ah

Degmada Bærum waxa ku yaala xannaanooyin dawladda hoose leedahay iyo kuwo gaar loo leeyahay. Kuwaasi waxay leeyihiin xeerar u gaar ah qorista/soo-gelida. Warbixin ku saabsan arrintaas waxa aad ka helayaa xeerarka xannaanada.